Hadii midkiin soo galo Masaajidka ha tukado labo Rakcadood, intaanu fariisan

Abii Qataada Alsalami Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Hadii midkiin soo galo Masaajidka ha tukado labo Rakcadood, intaanu fariisan".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu ku booriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Qofka soo gala Masaajid waqtigay doontaba ha ahaatee iyo ujeedaduu doonaba ha u soo galee, inuu tukado labo Rakcadood, intaanu fariisan, waana labada Rakcadood ee Taxiyatul Masjidka.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65091